# Baaritaanka DNA-da marka la codsanaayo sharciga degganaanshaha dalka (ciqaamadda)

Markii aad codsatay sharciga degganaashaha dalka ee ku salaysan xiriirka qoysnimo ee qofka kale idinka dhexeeya, waxaa haddii loo baahdo adiga iyo xubnaha qoyskaagaba lagu samynayaa baaritaanka DNA-da. Baaritaankaas waxaa la sameeyaa haddii aanay jirin wax dukuminti ah oo caddaynaya waxa aad isu tihiin qofkaas, ama dukumintiga aad haysataa uu yahay mid aan la aamini karin, amaba waraysigii hadal ahaanta ah ee lagula yeeshay aan si dhab ah loogu caddayn karin xiriirka ehelnimo ee idinka dhexeeya.

Codsiga baaritaanka DNA-da waxaa uu ka imaanaayaa dhanka Waaxda socdaalka (imaagareeshinka), qofka codsadaha ah ama qofka qaraabadiisa ah ee ku nool Finland, midkoodna ma codsan karo samaynta baaritaanka DNA-da.

## Waa maxay sababta loo samaynaayo baaritaanka DNA-da?

Baaritaanka DNA-da waxaa si weyn oo dhab ah loogu ogaan karaa, in shakhsiyaadka howshooda la baarayaa ay isdhaleen iyo inkale. Baaritaanka DNA-da ee lagu ogaanaayo xiriirka qaraabanimo ee labada qof ka dhexeeya, waa waxa ay ku salaysan tahay arrimaha la xiriira hiddosidaha uu jiilba kan kale uu u gudbinayo. DNA-da qof kasta oo dadka ka mid ah waxaa ka muuqda arrimaha hiddosidaha, kuwaasoo kalabar ka mid ah hiddosidayaashaas uu qofku ka keenay dhanka aabihiis, kala barka kalana dhanka hooyada. Hooyada iyo aabuhu waxaa ay iyaguna hiddosidahooda ka keeneen dhanka waalidkood.

Warbixinta ku saabsan arrimaha hiddosidayaasha waxaa ay ku jiraan saamiga DNA-da. Qaab dhismeedka DNA-daada waxaa la barbardhigayaa waxyaabaha ay ka kooban tahay qaabdhismeedka DNA-da xubnaha qoyskaaga. Isbarbardhiggaas ayaa waxaa lagu ogaanayaa warbixinta la xiriirta, in aad qaraabo tihiin iyo inkale.

## Bixinta oggolaanshaha ee la xiriirta samaynta baaritaanka DNA-da

Samaynta baaritaanka DNA-da waa mid aan khasab ahayn oo qofku uu u madaxbannaan yahay, waxaana samaynta baaritaankaas u shardi ah, in waraaq oggolaansho ah laga helo adiga iyo xubnaha qoyskaaga. Haddii adiga ama xubnaha qoyskaagu aad diidaan baaritaanka, islamarkaana aydaan keenin caddayn ku filan xiriirka qoysnimo ee idinka dhexeeya, waxaan gaaraynaa go'aan diidmo ah oo ku saabsan arrinka sharciga degganaanshaha dalka.

Haddii adiga si gaar ah lagaaga qaadayo saamiga dhiigga, waxaa saamiga kaa qaadaya qof xirfad u leh daryeelka caafimaadka, waxaana adiga lagaa codsanayaa in aad saxiixdo caddaynta arrinka ah, in aan wax dhiig ah laguugu shubin bishii u dambeeysay.

## Sidee baa loo sameeyaa baaritaanka DNA-da?

Baaritaanka DNA-du ma ahan mid caafimaad ahaan khatar ku ah qofka. Waxaana sida caadiga ah saamiga DNA-da laga soo qaadaa xuubka sare ee daanka ama dhabanka hoostiisa, iyadoo lagu soo qaadayo qori dhuuban oo afka suuf ama cudbi ku wata. Saami qaadistu wax xanuun ah ma lahan. Waxaa sidoo kale Saamiga DNA-da si gaar ahaaneed looga qaadi gacanta sidii saamiga dhiig-qaadista oo kale. Waxaana markaas dhici karta in saami qaadistu ay wax yar oo xanuun ah oo sida qanjaruufashada oo kale ah ay leedahay.

## Go'aan ka gaarista baaritaanka saamiga DNA-da

Si loo soo baaro saamiga DNA-da awgeed ayaan waxaan u diraynaa Hay'adda caafimaadka iyo nolol-wanaagga (THL). Si kasta oo aad u bixiso oggolaanshaha la xiriira qaadista saamigaas, oo adiga lagaaba qaado saamigaas, haddana Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) ayaa go'aan ka gaari karta in la baaro saamigaas iyo inkale. Saamiga lama baaraayo, haddii uusan arrinkaasu ahayn mid lagama maarmaan ah.

## Baaritaanka DNA-da marka qofku uu joogo Finland

Haddii aad joogto Finland gudaheeda, waxaa saamiga lagu qaadayaa xarunta adeegga Waaxda socdaalka. Adiga ayaa saamiga iska qaadaya. Ilmaha yar ee aan qaangaarin waxaa saamiga ka qaadaya waalidkiisa, wakiilkiisa, dano ilaaliyihiisa, ama tusaale ahaan hagihiisa u gaarka ah ama sooshalkiisa. Xaalado gaar ah awgood ayaa waxaa saamiga qaadi kara shaqaale ka tirsan Waaxda socdaalka. Waaxda socdaalka ayaa ku wargelinaysa qofka loogu yeeray baaritaanka goobta iyo taariikhda saamiga lagu qaadaayo.

Waa in aad hore u soo qaadataa oo aad dhiibtaa dukuminti aqoonsi ah, sida baasaboor, leeysin ama rukhsadda gaari wadista ama kaarka aqoonsiga. Shaqaale ka socda Waaxda socdaalka ayaa hubinaya aqoonsiga qofka, islamarkaana isaga ayaa ilaalinaya saami qaadista.

## Baaritaanka DNA-da marka uu qofku joogo dibadda

Xubnaha qoyskaaga ee jooga dalka Finland dibaddiisa waxaa saamiga looga qaadayaa safaaradda Finland ee ku taalla dalkaas ay joogaan, ama goob ay safaaraddu soo diyaarisay. Xubnaha qoyskaaga iyaga ayaa iska qaadaya saamiga. Ilmaha yar ee aan qaangaarin waxaa saamiga ka qaadaya waalidkiis ama tusaale ahaan qof qaraabadiisa ah. Xaalado gaar ah awgood ayaa waxaa saamiga qaadi kara shaqaale ka tirsan safaaradda ama Waaxda socdaalka.

Xubnaha qoyskaagu waa in ay hore u sii qaataan oo ay dhiibaan dukuminti aqoonsi ah, sida baasaboor, leeysin ama rukhsadda gaari wadista ama kaarka qoonsiga. Shaqaale ka socda safaaradda ama Waaxda socdaalka ayaa hubinaya aqoonsiga qofka, islamarkaana isaga ayaa ilaalinaya saami qaadista dalka dibadiisa lagu samaynayo.

## Natiijada baaritaanka

Saamiga waxaa lagu baarayaa xarunta caafimaadka iyo nolol-wanaagga (THL), kuwaasoo qoraalka natiijada ku saabsan u soo gudbinaya Waaxda socdaalka. Waxaan natiijada ku heleynaa muddo 1-2 toddobaad gudahood ah, laga soo bilaabo marka dhammaanba dadka la baaraayo ay dhiibeen oo laga qaaday saamiyada.

Uma isticmaalayno warbixinta baaritaankaas waxaan ka ahayn ujeedadii laga lahaa arrinkaan ee ah caddaynta xiriirka qoysnimo ee ka dhexeeya dadka la baarayo, taasoo ah shardi ku xiran siinta sharciga degganaashaha (ciqaamadda). Warbixinta aqoonsiga DNA-da iyo saamiyadaba waa la baabi'inayaa, marka la gaaro xalka arrinka la xiriira sharciga degganaanshaha (ciqaamadda).

Haddii loo baahdana waxaan adiga iyo xubnaha qoyskaaga ee baaritaanka ka qaybqaatay u qabanaynaa, ballan aan idiinku sheegeeyno aragtideenna la xiriirta natiijada baaritaanka. Baaritaanka DNA-da waxaa mararka qaarkood lagu ogaadaa warbixinta ku saabsan xiriirka qaraabanimo ee dhanka baayoloji ahaanta ah, taasoo dhammaan xubnaha qoysku aanay horay u ogayn. Qaababka DNA-da ee loo adeegsado caddaynta xiriirka qaraabanimada, ma sheegayaan dabeecadaha kor ahaaneed ee qofka la baaraayo, sida midabka jirka, sidoo kale ma sheegayaan wax ku saabsan xanuunnada, dabeecadda qofka ama waxyaabaha qofku hibada u leeyahay.

## Xadadka baaritaanka DNA-da

Haddii adiga iyo xubnaha qoyskaaga ka tirsan aydaan ahayn dad ehel ahaan uu ka dhexeeyo xiriir baayoloji ahaan ah (aydaan isdhalin ama wada dhalan), waa in arrinkaas si cad loo sheegaa marka la dalbanayo sharciga degganaanshaha (ciqaamadda). Xiriirka qoysnimo ee noocaas oo kale ah kuma caddayn karno dhanka baaritaanka DNA-da, waxaan  kaaga baahannahay in aad keento waxyaabo kale oo muujinaya nolosha dhabta ah ee qoyska ee arrinkaas la xiriirta.

Kharashka baaritaanka DNA-da waxaa bixinaysa dowladda Finland. Si kastaba waxaa kula soo gudboonaan kara in dusha lagaa saaro in aad magdhowdo ama soo guddo kharashkii ku baxay baaritaanka DNA-da, haddii aad si ula kac ah u bixisay ama u dhiibtay warbixinno khaldan oo ku saabsan xiriirkaaga qoysnimo ee idinka dhexeeya, iyadoo warbixinadaas khaladka ah lagu saleeyayna a